Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamanka Fedraalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qorolaaka kal.6-aad
Documentiga Kul.6-aad kul.15-aad **28/06/2015**

Kalfadhiga 6-aad
Kulankiisa 15-aad.Saac.Fur. 11:15gh. Saac. Xir.2:30gd.
Guntinta (Qourum) -148 Xildh.

Ajendaha:

1. **Furintaanka Aayadaha Qu'aanka Kariimka**
2. **Ansaxinta Ajendaha**
3.
4.

1.Shir-Guddoomiye ,Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari).
Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Baarlamaanka ee JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari),waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna akhriyey Xildh. Sheekh Shaacir. Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in Ajandaha la ansaxiyo ,Xildhibanadana way ansaxiyeen.

Xildh.Afaraale(point of order),wuxuu soo jeddiyey in Ajendaha lagu keeno Afka Hooyo.
2. Guddoomiyaha wuxuu sheegay in la dhageysto warbixinta Wasiirka Caddaaladda Mudane Ilkajiir.

3.Wasiirka Cadaaladda, wuxuu sheegay in Golaha Shacabka uu horkeenay xubnaha Guddiga Madaxa Banaan ee Garsoorka ,waa 5 -Xubnood ,wuxuuna codsadey in Golahu ka ogolaado, uuna diyaar u yahay in su'aalo la weydiiyo.

4. Guddoomiyaha wuxuu sheegay in codsiga wasiirka soo gaarey 20.05.2015ka lana doonayo in maalinta berito ah la meelmariyo.sida uu qabo Xeer-hoosaadka in 30 maalmood lagu soo dhiso Guddiga.
Xildh.MaxamedAmiinXasan.wuxuu sheegay in uu rabo in su'aal uu weydiiyo Shirka Golaha Wasiirada in laga magacaabey Guddiga Adeega Garsoorka waxaana ku qoran : Sheekh Axmed **Xildh.C/llaahiXuseen** oo la magacaabey 7/05/2015,iyo Maxamuud Xasan Dalab ,arintaas xog ayaa laga rabaa ?

Xildh.Maxamed C/llaahi Fadhayo,wuxuu sheegay in uu soo jeedinaayo 5-su'aalood .

Qod.109 Xarf.E ee Golaha Adeega Garsoorka,

1……

2.Garsoorka Maxakamadda Dastuurka Sharcigiina lama haayo .

3.Garyaqaanka Guud wuxuu u baahanyahay Xeer -Ilaaliye .148-ka Xildhibaan haddey jirto meel ay ku bedeleyn ,isagana uu yahay qof bashar ah oo qaldamikara, sharcigaani wixii ka mid ah oo garyaqaanka ay ku bedeleyn Xeer-ilaaliye waxaa la rabaa in lasaxo laguna soo celiyo isaga ?

4.Labada(2)-da xubnood garyaqaanada soo xulla oo soo magacaabaya ,haddii ay jirto Guddi Garyaqaanada Soomaaliyeed ay laheyd oo Xukuumadda u diiwaangashan Sharcigaasi ayaa loo baahanyahay in la hor keeno Golaha ?

5. 3-da(Seddexda) xubnood bulshada rayidka ah ee Madax-weynaha soo magacaabey oo magacaabistooda loo gudbiyey Golaha Wasiiradda Magacaabistoodana waa la rabaan?

6.Guddiga Xuquuqul Insaanka sharcigiisa weli kaamil ma aha lamina meelmarin oo lama ansaxinin. Guddoomiyaha isagana Sagaalkaas(9)-Xubnood ee guddigaasna lama magacaabin .

Lixda(6)- Cid la qorey oo sharci ah lama haayo in uu ansax ka noqdo Golaha hortiisa waa la rabaa . wuxuu soo jeediyey in dib loogu noqdo ,su'aalahana Wasiirka ka jawaabo ,wuxuu soo jeediyey in Sharcigaan dib loo celiyo lana soo saxo.

Xildh.Ibraahin Cali Cumar, wuxuu sheegay in ay istaagay in la dhameystiro wixii u dhiman Guddiga Madaxa- banaan .wuxuuna ku dhisan yahay 4.5,taasoo Baarlamanka ka dhigay ina la sameeyo Cod qarsoodi ah.

Jwb.

7.Wasiirka

Wuxuu sheegay in Su'aalaha Fadhayo uu u deynaayo Guddoomiyaha Baarlamanka ,tan kale mida Maxkamadda Dastuurka iyo Golaha adeega Garsoorka waxaa magacaabaya cid soo xusha Maxkamadda Dastuurka.Markii la sameeyo xubnaha Guddiga Maxakamadda sare.

Garyaqaanada way jiraan ,waxaa jira ururka garyaqaanada waxayna ku leeyihiin Muqdishso iyo punt- land, CV- yada la qabtay waxaa loo gudbiyey GolahaWasiirada, waxaa lagu soo xulay 4.5

Xildh.Axmed Aabi Aadan,wuxuu sheegay in la soo dhameystiro xubnaha Guddiga Garsoorka si loo meelmariyo.

Xildh.Seynab Maxamed Caamir, waxay sheegta in wixii ka soo horjeeda Dastuurka uunan shaqeyneynin,waxayna codsatey in 9-ka Xubnood ee Guddiga madaxa banana saddex xubnood la dhigo Haweyn,Garyaqaanka Guudna lagu soo daro Guddiga Madaxa Banaan.

Xildh.BishaarUgaas, 7- xubnood oo katirsanWasaarada Cadaalada oo la soo gudbiyay 08/02/2014, sharciga lagu dhisay Guddiga Adeega Garsoorka waxaa sheegaya qodobka 7-aad Far.2-aad ee Dastuurka, GolahaWasiiradana ay soo ansixiyaan. Waxa ugu sareya waa in aad sharciga soo waafajisaan, C V-da waxaa ku qoran afka Ingiriisiga ,kumana soo darin wax lifaaq ah waxaan sharci aheyn in la ansixiyo. Wuxuuna soo jeediyay in dib loo caliyo sharcigana la waafajiyo.

Xildh.Nadifo Maxamed, waxay sheektay in Guddiga Madaxa-banaan ee Garsoorka lagu dhisay 4.5waana been Guddiga la magacaabaayo Baarlamaanka JFS waa inuu arkaa,waxay soo jeedisay in lagu soo daro dadka dhiman codsiyooda.

Jwb.

8.Wasiirka wuxuu sheegay in dooda gabadhaha Xildhibaanadda ay tahay mid meesha ku jirta, Gabdhaha inta keensatey C.V. yadooda waxay aheyd hal gabar , waxaa tixgelin la siinayaa kolba inta C.V. yadooda keensata ma jirto cid banaanka laga soo qabqabanaayo. Waxaa la sameeyey guddi baarta c.v. yadda waxaa lagu qeybsadey 4.5 oo ka mid ah Guddoomiyaha Maxkamadda sare. Maxkamadda Dastuuriga yaa dhisaya ma Xeer Ilaaliyaha guud iyo Garyaqaanka Guud.

Xildh.Ibraahim Suleymaan Xaaji Nuur., wuxuu sheegay in laga hadley Qod.109.
Qod.2-aad waxaa ku yaala garyaqaanka guud ,marka haddii ay iska horyimaadaan Dastuurka iyo sharciga , waxaa sharci ah in la raaco Dastuurka ,habraaca Baarlamankana uu ansaxiyo .
Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Maxakamadda Dastuuriga Sharciga 128 ayuu khilaafsanyahay Qod.109 Far.7-aad iyo 8-aad Xar. H. oo shuruudaha.
Wuxuu kaloo sheegay wasiirka in uu keenay xubno qabyo ah ,taana sharciga way khilaafsantahay qodobka Dastuurka . waxaa fiicneyd in Wasiirka eego Sharciga Adeega Garsoorka in uu qorayo in uu leeyahay hab asluubeyd .
Xildh,Cabdi Cali Xasan wuxuu sheegay in uu taageyrsanyahay xubnaha Baarlamanka, dastuurka sida uu qoraayo ayaa sax ah in lagu soo daro Garyaqaanka Guud waayo 30 June 2014ka waxaa lagu bedelay Guddoomiyaha Adeega Dastuurka ,Golahana way ansaxiyeen.

Xildh. C/ladhiif Xasan Nuur(Sanyare),wuxuu sheegay in guddiga 9(Sagaal) Xubnood ay ka koobanyihiin Dastuurka waxaa ku qoran garyaqaanka guud . 3-da Bulshada Rayidka ah wuxuu soo jeediyey , markii Guddiga Xuquuqul insaanka la dhiso in la saxo.
Dadkaan ma aha dad loogu tala galey Adeega gasoorka ,wuxuuna u soo jeediyey wasiirka in uu dib ula noqdo.

JWB.

9.Wasiirka , wuxuu sheegay haddii Xeerka iyo Dastuurka ay iska horyimaadaan, waxaa la qaadanayaa Dastuurka.

Wuxuu kaloo sheegay in ay u taalo Golaha ,waxaa loo keenay Xeer la yiraahdo Lam. 6 **,taa ayuu ka soo diyaariyey Sharcigaan,welina ma jirto hal Xeer Golaha Barlamanka ka soo baxay oo isaga loo soo gudbiyey.** Sida ay u soo gudbiyeen haddii la diido ,wuxuu weydiiyey Golaha Cidda Magacaabeysa Maxkamadda Dastuuriga ,haddii la celiyo yaa noo sameynaya Maxkamadda Dastuuriga .Marka wuxuu sheegay in ay u soo gudbiyeen 7(Todobo Xubnood),wuxuuna u soo jeediyey in ay Golaha ogolaadaan.

Xildh.C/qaadir Aadan Sii-sii ,(point of order)wuxuu sheegay Wasiirka isaga oo aan jirin Guddi Xuquuqul Insaan in la dhiso Garyaqaanada . Maxkamadda Dastuuriga ma dhisna,wuxuu soo jeediyey in ay dhisayaan Guddiga hadda la dhisaayo ,in Wasiirka uu yiraahdo ansaxiyana waa khalad.Garyaqaanada ayaa noqonaaya ,kadib waa la bedelayaa sida sida Xeerka uu u qoranyahay Qareenadana in la soo dhiso.

Xildh. Cali Aadan Xuseen, wuxuu sheegay in baarlamanka uu ku sameynkaro Amendament uusan Cid kale sameyn karin,ninka la bedelay wuxuu ahaa digil iyo mirifle hala sheego Cidda lagu bedelay ?wuxuuna soo jeediyey in Wasiirka dib ula noqdo .

Xildh. C/llaahi Jaamac ,wuxuu sheegay in arimo badan laga hadley, waxaana keenay motion arimo badan lagu saxayo shuruucda Dalka . Waxaa loo bahanyahay in la cadeeyo sida ay wax u kala heleyn natiijadooda . Haddii la celiyo sideebaa la dhahayaa Maamul Goboleedyada Kale.

Wuxuu soo jeediyey haddii laga wareejinaayo Garyaqaanka Guud ,waa in si sharci ah loo bedelo.

Xildh. Maryan Macallin,waxay sheegtey in ay horyaaliin 3(seddex) Guddi ,sida ay ka arkeyn waxaa ka muuqata caddaalad daro, waxay soo jeedisey in ay ka muuqdaan Haweynka Soomaaliyeed,si cadaalad ahna lagu saleeyo.

Xildh.Aweys C/llaahi(Point of order),wuxuu sheegay in uusan ku gancin waxa uu wasiirka ku jawaabey ayna qoraan dadka wasiirka la socda .

Xildh. Xiis Muuse Cawl. Wuxuu sheegay in la bedelay Garyaqaanka Guud ,yaa bedelay 8(sideeda) kalana Wasiirka uma dhama ,wuxuu soo jeediyey in uu soo dhameystiro ,dibna ula noqdo Hindise Sharciyeedka.

JWB

10.Wasiirka,wuxuu sheegay in wixii ka dhiman uu soo dhmaeystiridoono ,tankale guddiga way soo mariyeen Xujada Dastuurka waxay u taalaa Guddoonka ,tan xubnaha Golaha ayey u taalaa wixii ay ka yeeli lahaayeen.

11.Guddoomiyaha ,wuxuu u sheegay wasiirka in uu soo gunnaanado hadal jeedintiisa.

12.Wasiirka Caddaaladda Mudane Ilka jiir, Wuxuu aad iyo aad ugu mahadceliyey dhammaan Xubnaha Golaha Shacabka. Wuxuuna sheegay in uu yahay adeege wixii aaraa ah ay Golaha soo jeediyeena uu qaadandoono.

13. Guddoomiyaha ,wuxuu sheegay in ay is arkaan Guddiga Garsoorka iyo Wasiirka Caddaaladda ay ka soo shaqeeyaan oo malinta Talaadada ee soo socoto ay keenaan warbixintooda .

Guddoomiyaha wuxuu intaas ku darey in beri ay jirto in uu horyimaado Golaha Wasiirk Arrimaha Gudaha .
Kalfadhiga 6-aad Kulankiisa 15-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari. Wuxuu sheegay in uu shirka xiranyahay saacaddu markey aheyd 2:30gd.